

Bilaabida kindergarten – waa goorma waqtiga ugu fiicani?



Dawlada Fiktooriya waxay siisaa kharaj kaalmayn ah carruurta tagta kindergarten-ka sanada ka horraysa sanadka ay dugsiga bilaabayaan.

Waa muhiim in carruurta bilaabaan dugsiga markay diyaarka u yihiin inay si rasmi wax ugu bartaan bay'ad. Sidaas darteed muhiim ayay u tahay waalidiinta inay qadariyaan waqtiga ku haboon in ilmahoodu bilaabo dugsiga – maadama taasi go'aaminayso waqtiga ugu saxsan oo la tegayo kindergartenka.

- Ilma kasta oo bilaaba kindergarten ayaa ka bixi kara barnaamijka haddii waalidku go'aansadaan ilmuhu in aanu bilaabin karin dugsiga sanada soo socota. Go'aanka badanaa waxaa lagu sameeyaa wada hadal dheer oo u dhexeeya waalidka iyo baraha kindergartenka wixii ku saabsan ilmaha waxa u fiican. Ka bixida barnaamijka kindergarten-ka ka hor dhamaadka teeramka 2aad macneheedu waxa weeye ilmuhu weli wuxuu awoodi doonaa inuu ku soo noqdo sanada soo socota ka hor intaan dugsigu bilaaban.
- Waxaa kaloo jira qorshe sanadka labaad oo kindergartenka carruurta loo arkay inay leeyihiin dib u dhac. (arag qoraalka ilmuhu ma baahan yahay sanad labaad oo kindergartenka ah?)

Waxaa dhici kara jaahwareer ka iman kara xalalkaan markay waalidka soo waajahdo in ilmahoodu laga yaabo inuu ka faaiidaysto inuu sanad kale sii joogo barnaamijka kindergartenka. Fadlan la hadal shaqaalaha adeegaaga jooga.

Sugidda sanad kale kindergartenka

Ilma walbaa tankiisa ayuu u koraa, in kastoo ilmahaaga da'diisu laga yaabo inay xaq u siiso inuu tago barnaamijka kindergartenka, waxyaallo kale ayaa laga yaabaa inay saamayn ku yeeshaan diyaargarawga waaya-aragnimadaas.

Markaad samayso go'aan ilmahaaguna aado kindergartenka, adiga iyo baruhu waxaa laga yaabaa inaad aragtaan calaamadaha in ilmahaagu aanu diyaar u ahayn waaya-aragnimadaas. Ugu horayn, waa inay jirtaa calaamado saraaxadeed, wada hadal daacad ah oo u dhexeeya adiga iyo baraha, ilaalinta ilmaha baahidiisa iyo danta ugu weyn ee baahida qoyska ugu horaysa.

Aragti laga yaabo inay soo baxdo ayaa ah in ilmahaagu aad uga faaiidaysan doono waaya-aragnimada kindergartenka haddii ilmuhu sanad sugo. Badanaa arrintu waxay ku xiran tahay hanaqaadida ilmaha, arrin waqtiga is kala dhamaan doonta. Xaallada noocaan ah, haddii aad kala baxdo ilmahaaga dhamaadka teeramka 2aad, markaas waxaa ilmuhu hellayaa kindergarten hal sano oo buuxda ah sanada soo socota.

Qof kasta ayaa kala bixi kara dhamaadka teeramka 2aad hal sanana dib u dhigan kara kindergartenka, ilmahana ku soo celinaya sanadka soo socda.

Xasuuso

- Si taxadar leh uga feker marka ilmahaaga ay u badan tahay inuu diyaar yahay inuu bilaabo dugsiga, sidaas darteedna ay tahay waqtiga ay ugu fiican tahay inuu ilmuhu hello khibrada kindergartenka. Haddii aadan hubin, la hadal kuwa kale oo yaqaan ilmahaaga aadna aaminsan tahay aragtidooda.
- Tag fadhiga macluumaadka kindergarten, weydiina wixii ku saabsan barnaamijka kindergartenka.
- Ka hor iyo ka dib inta aanu ilmahaagu bilaabin barnaamijka kindergartenka, la wadaag baraha dareenkaaga, aragtidaada iyo fikradaha ku saabsan ilmahaaga, si saraaxa ah.
- Haddii aad u baahan tahay in wax lagu kala caddeeyo ama macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan waqtiga ay ugu fiican tahay in ilmahaaga la geeyo kindergartenka, la hadal ilmahaaga barahiisa, xiriiriyaha daryeelka ilmaha ama kalkaalisada caafimaadka ilmaha iyo hooyada.